

Badbaadada Dumarka

(Qorshaha
Badbaadada)

**HADDII AAD KU SUGAN TAHAY
KHATAR DEGDEG AH**

**TELEEFONKA
000**

Siinta badbaado iyo soo dhaweynta taageerada muddada gaaban ee qalalaasaha taasoo loogu tala galay dumarka iyo caruurta ka cararaya xadgudubyada ka dhex dhaca qoyska iyo guriga

Combined Women's Refuge Group (CWRG) waa cidda ugu sareysa ee matalaysa danaha iyo tabashooyinka xadgudubka ka dhex dhaca qoyska ee qaybta qaxootiga gudaha South East Queensland.

Waxaanu midaynaa rabshadaha ka dhex dhaca qoyska iyo guriga qaxootida si aan ugu doodno xaquuqda dumarka iyo caruurta si ay ugu noolaadaan nolol aan xadgudub lahayn.

www.cwrg.org

Horumarka iyo soo saarista warbixintaan waxaa maalgaliyay Challenge DV.

www.challengeDV.org

Waxaa muuqaalada u sameeyay LM Strangways.
Dhaqamo Badan, Hal Safar



(SU'AAL&JAWAAB

Waa maxay xadgudubka qoyska iyo guriga ka dhaca?

Xadgudubka qoyska iyo guriga ka dhex dhaca waxa uu ka kooban yahay dhaqamo fara badan kuwaas oo si ulakac ah loo isticmaalo si dadka kale loogu awood sheegto. Waxay ka dhacaan xiriirada noocyada kala duwan leh, oo ay kamid yihiin lamaanaha isku dhow, daryeel bixiye iyo xubnaha qoyska ee kala duwan. Xadgudubka guriga ka dhaca waxaa kamid ah qaabab badan oo ah dabeecad koontarool, waxaana kamid ah waxyeelayn jirka ah, handadaad iyo cagajuglayn iyo/ama xakamaynta halka aad aadayso iyo cidda aad la kulmayso.

Waa maxay women's refuges?

Women's refuges waxay siiyaan soo dhaweyn iyo taageero wax ku ool ah dumarka iyo caruurta u baahan in ay ka fakadaan xaalado xadgudub ah.

Mararka qaar waxaa loogu yeeraa harka dumarka, guriga badbaadada ama meelaha qarsoon ee lagu dhuunto.

Guryaha Qaxootigu dhammaantood waa ay ka yara duwan yihiin, si kastaba ha ahaatee dhammaantood waxay ku siinayaan meel aad ku daryeesho waxna ugu karsato caruurtaada. Qaarkood waxay leeyihiin jiko la wadaago; si kastaba ha ahaatee markasta waxay leeyihiin meel gaar ah oo la seexdo.

Maxaad samayn kartaa?

- Kala hadal DVConnect ama booliska waxyaabaha ku saabsan Xaaladaha Xadgudubyada Guriga ka dhaca.
- Si taxaddar leh uga fikir cidda aad u sheegayso qorshahaaga, kuwaas oo ay ku jiraan caruurta iyo saaxibaduba.
- Go'aanso cidda aad wacayso iyo meesha aad aadayso haddii aad lagu hanjabo ama aad khatar kujirto.
- Ka taxadarka badqabka caruurtaada marka aad qorshaha sameenayso.
- Kaydso lacag aad ku safarto waxaadna yeelataa guri iyo fureyaal gaari oo dheeraad ah
- Hayso liiska lambarada teleefoonka ee muhiimka ah, sida taksiga iyo booliska deegaanka.
- Ku diyaarso boorso dhar iyo daawo.
- Kaga tag fureyaal dheeraad ah iyo nuqulada waraaqaha muhiimka ah (sida baasaboorka, warqadda dhalashada iyo warqadda meherka) qof aad aaminsan tahay.
- Samayso liiska waxyaabaha aad u baahan tahay in aad dib ula soo baxdo.

Qaabka ugu wanaagsan oo qorshe badqab lagu samayn karo waa in la haysto adeeg taageero.

Ka wac DVConnect 1800 811 811.

**HADDII AAD KUJIRTO
KHATAR DEGDEG AH**

**TELEFPOONKA
000**

**DVConnect Womensline Wax ka qabashada qalalaasaha ee 24ka saac ah
1800 811 811 • www.dvconnect.org**

DVConnect waxay bixisaa layn wicitaan oo taageero ah kaasoo loogu tala galay xadgudubka ka dex dhaca qoyska iyo guriga oo bilaash ah.

DVConnect waxay kaa caawin kartaa in aad ka baxsato xadgudubka guriga ayada oo ku siinaysa gaadiid degdeg ah iyo deegaan amaan ah.

Meelaha dumarku ku badbaadaan ma yihiin kuwo amaan ah oo badqaba?

Haa, dhammaan ciwaanada meelaha badbaadad iyo lambarada teleefoonaduba waa kuwo si adag loo qariyay, waxayna refuges leedahay amaan.

Muddo intee le'eg ayay caruurta iyo dumarku joogayaan meelaha ay isku badbaadinayaan?

Meelaha badbaadadu waxay qaabilayaan caruurta iyo dumarka muddada ay u baahan yihiin.

Majirtaa kiro lagu qaado meelaha badbaadada dumarka?

Kiradu kama badna 25% dakhligaaga xaaladaha qofka u gaarka ahna waa la tixgalinayaa.

Waxaan ahay naafo. Ma heli karaa meel aan ku badbaado?

Haa. Meelaha badbaadadu waxay leeyihiin qaabilaad la heli karo. Wac DVConnect una sharax waxyaabaha aad doonayso.

Waa sidee rabaayaddaydu?

Meelo badan oo la isku badbaadiyo ayaa leh deegaan u wanaagsan rabaayadda. Taa baddalkeeda, RSPCA ayaa kaa caawin karta korinta rabaayaddaada guriga si loo xaqiijiyo in ay nabad qabaan.